HERITAGE INSTITUTE

Faallo

Nofeember 2024

# Gorfaynta Go'aanka Golaha Wadatashiga Qaranka: Iyo Cawaaqibkooda Siyaasadeed Ee Mustaqbalka Soomaaliya

**Xuquuqda daabacaaddan © 2024 | Waxa ay u dhawrsan tahay Machadka Daraasaadka Siyaasadda ee Heritage.**

Akhristayaasha waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay sii tarmiyaan xogtan, oo ay iskood u daabacaan, balse sinaba ugama ganacsan karaan. Xaqle ahaan, Machadka Heritage waxa uu si xushmad leh uga codsanaynaa cid kasta oo daabacaddan sii badisaa, in ay mahadnaq iyo nuqul daabacaaddeeda ka mid ah noo hibayso. Adeegsiga khadka tooska ah, waxa aan waydiisanaynaa akhristayaasha in ay ku xirnaadaan macluumaadka shabakadda.

**© Heritage Institute 2024.**

Go'aankii ay soo saareen Golaha Wadatashiga Qaranka 30-kii, Oktoober 2024, ayaa dood weyn oo culus ka dhex dhaliyay hormuudka siyaasadda dalka. Go'aamadan ayaa taabanaya arrimo xasaasi ah oo la xiriira doorashooyinka soo socda ee heer faderaal iyo heer dowlad goboleedba. Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud oo qaba, kuna adkaysanaya, in dalka laga qabto doorashooyin qof iyo cod ah ayaa  ah ayaa dooddan xuddun u ah. Mabda'an, doorashooyin qof iyo cod ah, waxa uu ka turjumayaa rabitaanka inta badan ee shacabka Soomaaliyeed, kuwaas oo u hanqal taagaya in ay ka gudbaan nidaamka doorashada dadban taas oo ragaadisay doorashooyinkii dhowaan dalka ka qabsoomay. Doorashooyinka dadban waxa si weyn u saameeya musuqmaasuq iyo nin jeclaysi ay ku kacaan hoggaamiyeyaasha faderalka iyo dowlad goboleedyaduba, kuwaas oo keena xasilooni darro siyaasadeed iyo niyadjab baahsan. Dadka Soomaaliyeed waxa ay si weyn u xasuustaan jaahwareerkii iyo qalalaasihii siyaasadeed ee 2016/2017 iyo kii 2021/2022, xilliyadaas oo ay doorashooyinkii dhacay ku suntanaayeen ku shubasho, faragalin iyo musuqmaasuq baahsan.  Qaran uu hareeyay degenaansho la'aan siyaasadeed tan iyo doorashooyinkii musuqmaasuqa ba'naa ee dhacay 1969-kii, oo uu ka dhashay afgambigii militariga, in lagu soo dabbaalo doorashooyin qof iyo cod ahi waa yididiilo iyo rajo dimuqraaddiyadeed oo Soomaaliya gaadhitaankeeda u halgamayso, balse ka miradhalinteedu u baahan tahay feejignaan dheeraad ah.

Aragtida ku salaysan doorashooyin qof iyo cod ah, oo ay wehilso siyaasad ku dhisan xisbiyo siyaasadeed salka ku haya tartan fikradeed, ayaa ah mid ay dadka Soomaaliyeed ku  helayaan fursad  ay ku kala xushaan, kulana xisaabtamaan madaxdooda. Aragti ahaan, in loo guuro mabaadi'da dimuqraaddiyaddu waa arrin ay soo dhowaynayaan dhammaan dadka doorka ku leh siyaasadda Soomaaliya. Laakiin, in kastoo ay tahay arrin soo jiidasho leh, in badan oo ka mid ah mawaadiniinta iyo dadka doorka siyaasadeed lihi shaki weyn ayay ka qabaan ujeeddooyinka Madaxweyne Xasan Sheekh iyo weliba awoodda uu u leeyahay in uu fuliyo ballanqaadka doorashooyin qof iyo cod ah, marka loo eego sababahan soo socda:

**Tan koowaad,** Madaxweyne Xasan Sheekh, oo ay wehliyaan xubno ka tirsan Golaha Wadatashiga Qaranka (marka laga reebo Puntland), ayaa 2023 sameeyay ballan kan la mid ah, isaga oo sheegay in doorashooyin qof iyo cod ah lagu soo dooran doono golayaasha deegaanka ee dalka iyo hoggaamiyeyaasha dowlad goboleedyada, kuwaas oo dhicitaankooda loo qoondeeyay 2024; balse waa uu ku guuldarreystay fulinta ballanqaadkaas. Taasi waxa ay sabab u noqotay in dad badani su'aal galiyaan sida uu madaxweynuhu uga dhabayn karo ballanqaadkiisan cusub.

**Tan labaad,** madaxweynuhu waxa uu heshiiskan la galay hoggaamiyeyaasha dowlad goboleedyada oo uu muddo-xileedkoodu dhammaaday sannad ka hor. Hoggaamiyeyaashan ayaa cimri-dherer siyaasadeed ka dhex arka dibudhaca doorashooyinka ee soo noqnoqday, maadaama muddo-kororsigu u suuragalinayo in ay sii haystaan xilal aan lagula xisaabtamin ama aan sharci ku dhisnayn. Soomaali badan ayaan liqi karin in sannad kale loo kordhiyo hoggaamiyeyaasha dowlad goboleedyada, taasina waxa ay kor u qaadday shakiga laga qabo sida ay madaxda madashu u hir-galin karaan doorasho qof iyo cod ah oo dhab ah.

**Tan saddexaad,** ballanqaadka Madaxweyne Xasan Sheekh, ee ku saabsan doorashooyin qof iyo cod ah, waxa uu noqon lahaa mid lagu kalsoonaan karo haddii uu ku guulaysan lahaa in uu gobolka Benaadir ka hirgaliyo doorasho deegaan oo qof iyo cod ah, maadaama ay tahay gobolka kaliya ee ay si buuxda u xukunto dowladda faderaalku. In kasta oo ay jiraan ballanqaadyo soo noqnoqday, oo markasta bura, haddana ku dhowaad saddex milyan oo qof oo deggan gobolka Benaadir ayaa weli ku hoos jira maamul kor laga soo magacaabay, taas oo duudsiday xuquuqdoodii ay u lahaayeen doorashada hoggaamiyayaashooda. Ballanqaadyadaas aan la fulin ayaa shaki weyn gelinaya in uu madaxweynuhu ka dhabeeyn doono qabashada doorashooyin qaran oo qof iyo cod ah, sababta oo ah waxa muuqda isdiiddooyin u dhaxeeya hadalka iyo ficilka.

**Tan afaraad,** abaabulka doorashooyinka qof iyo codka ah ee soo cusboonaaday, ayada oo la dhaafay bartamihii muddo-xildeedka madaxwaynaha, ayaa sii xoojiyey oo kaliya shakiga u dhexeeya daneeyayaasha siyaasadda. Dad badan ayaa ka walaacsan in ay arrintani noqon karto xeelad siyaasadeed oo uu madaxweynuhu muddo-xileedka ku kororsanayo marka ay ka dhamaanto afarta sano, taas oo la mid ah isku daygii madaxweynihii isaga ka horreeyay sanadkii 2021. Isku daygaas ayaa horseeday iska hor-imaadyo rabshado wata oo ka dhacay Muqdisho, taas oo muujisay cawaaqibxumada ka dhalan karta doorashooyinka sida xun loo maamulo.

**Tan shanaad,** caqabadda ugu weyn ee hortaagan ka dhabaynta doorashooyin qof iyo cod ah, waa maqnaanshaha laba gobol ee xubnaha ka ah dowladda faderaalka oo kala ah Puntland iyo Jubbaland, oo uu weliba weheliyo maamulka dhowaan la aqoonaday ee SSC-Khaatumo. Bulsho aad u kala qaybsan, wadajirka iyo wadar-oggolku waa u lafdhabar, sidaas darteed doorasho kasta oo la doonayo in lagu qanco waxa ay u baahan tahay in ay qayb ka noqdaan gobollada maqan iyo siyaasiyiinta mucaarku. Haddii aanay heshiis ku ahayn daneeyayaasha siyaasaddu, oo ay ku jiraan mucaaradku, helis weyn ayaa ku gadaamnaan karta sharcinimada doorashooyinka qof iyo cod ah.

Marka loo eego caqabadahan, madmadow badan ayaa ku gadaaman dooraashooyinka qof iyo cod ah ee ku qabsooma jawiga siyaasadeed ee hadda jira.

Si kastaba ha ahaatee, Madaxweyne Xasan Sheekh oo dhowaan ku dhawaaqay in uu gogol turxaanbixin ah u dhigayo dowlad goboleedyada fikirkan ka soo horjeeda ayaa ah tallaabo wanaagsan. Tallaabadani waxa ay abuuraysaa rejo wanaagsan oo weli suuragalin karta in is-afgarad iyo dhab-u-heshiin siyaasadeed laga gaaro doorashada soo socota. Hoggaamiyayaasha Puntland iyo Jubbaland waxaa ku gudboon in ay soo dhaweeyaan gogosha uu madaxweynuhu ku baaqay, oo ay dib ugu soo biiraan Golaha Wadatashiga Qaranka, iyaga oo qiimaynaya danta midnimada qaranka.

Sida oo kale, waa in uu Madaxweyne Xasan Sheekh muujiyaa dabacsanaan iyo xilkasnimo hoggaamineed, isaga oo u tanaasulaya, isla markaana tixgelinaya tabashooyinka dowlad goboleedyada maqan iyo kooxaha mucaaradka. Ruuxdaas wadashaqayneed waa jidkii uu Madaxweyne Xasan Sheekh laftiisu u ololaynayay markii uu ahaa hogaamiye mucaarad ah sannadihii 2021 iyo 2022.

**Si hore loogu tallaabsado,** waxa ay talooyinkan soo socda tibaaxayaan jidka loo mari karo hannaan doorasho oo xasilloon, loo dhan yahay, islamarkaana lagu kalsoonaan karo:

1. **Abuuridda hannaan doorasho oo heshiis lagu yahay:** In la sameeyo hannaan doorasho oo ay heshiis ku yihiin dowladda faderaalka, dawladaha xubnaha ka ah federaalka, mucaaradka iyo bulshada rayidka ah. Hannaanka noocan ahi waxa uu horseedayaa aasaas waara loo dhigo doorashooyinka 2026, wuxuuna kobcinayaa midnimo qaran. Degdegga iyo meel soke wax ka raadinta waxaa laga dhaxlayaa kala qaybsanaanta iyo kalsooni darroda oo sii xoogeysta.

2. **Abuuridda hannaan doorasho oo heshiis lagu yahay:** Hufnaanta hannaanka doorashadu waa lama huraan. Iyada oo aan loo eegin in doorashadu tahay mid toos ah ama mid dadban, hannaan doorasho hufan oo caddaalad ahi waa inuu Meesha ka saaraa dhaqannadii musuqmaasuqa, isla markaana dammaanad qaadaya islaxisaabtan. Xarumo dhawr ah, oo uu ka mid yahay machadka Heritage, ayaa soo bandhigay hannaano doorasho macquula ah, lana hirgelin karo, kuwaas oo horseedi kara hab doorasho hufan, oo lagu kalsoonaan karo, taas oo ay habboon tahay in ay dowladda faderaalku dhaqangaliso.

3. **In Midnimada Qaranka laga hormariyo danaha siyaasadeed ee muddada dhow:** Madaxda Soomaalidu waa in ay damacooda shaqsiga ah ka horraysiiyaan xasilloonida qaranka. Ma jiro hoggaamiye Dowladda Faderaalka Soomaaliya oo keligii rabitaankiisa ku jujuubi kara qaranka; hoggaamin dhab ah ee Soomaaliya waxa ay u baahan tahay isu-tanaasul, wadaxaajood, iyo ku mitid xukun la wadaago.

**Ugu danbayn,** madaxda dowladda faderaalka Soomaaliya iyo dowlad goboleedyadu waa in ay mudnaanta siiyaan hufnaanta iyo xalaalnimada doorashada, marka loo barbardhigo nooca doorashada.

Ama halla hirgeliyo doorasho toos ah ama mid dadbane, jidka kaliya ee lagu soo noolayn karo kalsoonida shacabku waa in Soomaaliya laga hirgaliyo doorasho caddaalad ah oo ka madax bannaan talo-marooqsiga iyo musuqa madaxda federalka iyo kuwa goboladda, taas ayaana lagu gaari karaa nidaam dimuqraadiyadeed iyo mustaqbal siyaasadeed oo xasilloon. In dalka oo dhan laga qabto doorashooyin qof iyo cod ah ayaa lafdhabar u ah guusha safarka doorashooyinka Soomaaliya. Hirgelinta doorasho hufan loona dhan yahay, ayaa ah rejada ugu wanaagsan ee ay Soomaaliya ku gaari karto nabad waarta iyo mustaqbal hagaagsan. Ka dhabaytna iyo xaqiijinta riyadaasi waa masuuliyad saaran dhammaan hoggaanka siyaasadda Soomaaliya.

HERITAGE

INSTITUTE

The Heritage Institute for Policy Studies
http://www.heritageinstitute.org